**Maxaa ka caawinaya ardaygaaga inuu u diyaar garoobo mustaqbalkiisa isaga oo weli ku jira dugsiga sare?**

Yoolka Utah waxaa weeye in dhamaan ardayda ka qalin jabinaysa dugsiga sare ay diyaar u noqoto kuuliyada, mihnada iyo nolosha, si ay u beegsadaan mustaqbalka ay doortaan. 2025, badanaa sadexdii shaqoba laba dalka oo dhan ah (65%) waxay u baahan doonaan waxbarasho dugsiga sare kadib ah ama tobobar.[1] "Badanaa ardaydu waxaa loo baahan doonaan inay helaan shahaadada dugsiga sare kadib ah si ay u qaadan karaan mushahar wanaagsan oo dhaqaalaha maanta ah."[2]

**Waxa aad qaadataa wakhti aad ku eegeyso dhabooyinka barnaamijyadan.**

Ardayda Utah waxay leeyihiin ikhtiyaaro badan oo dugsiga sare ah oo ay ku eegeyaan waxay doonayaan, qaadan karaan, iyo duruus sare si markaa inta la qalin jabisa ay si wanaagsan u isticmaali karto fursadaha dugsiga sare kadib—Meelayn Meel Sare ah (AP), Qoraalka Wakhtigan Wada Socda (CE), Mihnada iyo Waxbarashadda Farsamada Gacmeed (CTE), Baajolaarka Kuuliyada oo Caalami ah (IB), waxbarashadda shaqada ku salaysan iyo fursado kale. Ardaydu waxay isku darsan karaan AP, CE, CTE iyo IB duruusta ah oo bixiya waxa ugu haboon baahiyaha iyo kuuliyadaha. **Waxa aad kala sheekeysataa macalimiinta iyo lataliyayaasha dugsiga wixii ku saabsan ikhtiyaarada.**

1

## MEELAYN MEEL SARE AH (AP)

Macluumaadka AP—https://schools.utah.gov/curr/earlycollege?mid=1354&tid=1

### Waa Maxay?

- Fasaladu waxaa weeye duruus sare oo kuuliyada ah, oo ay ku dhigaan macalimiinta dugsiga sare, dugsiga sare.
- Manhajka waxaa sameeyay macalimiinta si loo buuxiyo shuruudaha Gudida Kuuliyada.
- Ardaydu waxay heli karaan dhibcaha kuuliyada iyada oo ku heleya imtixaan ay maraan dhamaadka dariska. Waa inay helaan 5 tiiba 3 dhibcaha imtixaankooda.
- Gelitaanka imtixaanka AP waxaa weeye ikhtiyaar, laakiin waxa loogu baahan yahay dhibcaha kuuliyada.

**In si wanaagsan looga soo wareejisto dhibcaha dugsiga sare jaamacada iyo jamaacad inta laga soo wareejiyo loo wareejiyo jaamacad kale.**

### Ardayda AP:

- Ma doonaysaa inaad bilawdo duruus dugsiga sare ah
- Ma qorshaynaysaa inaad gasho kuuliyada ama jaamacad

### Xirfadaha La Bartay iyo Lagu Shaqeeyay:

- Xidhiidhka—helida iyo bixinta fariimaha
- Qorshaynta, habaynta iyo maamulida
- Masuuliyada, go'aan qaadashada, iyo hogaanka
- Xalinta mushkilada, qiimaynta iyo fikirka
- Muujinta dejinta yoolka iyo khidadaha la gaadhi karo
- Qorshaynta, habaynta, iyo maamulida
- Waxbarashada mudada dheer ah

[1] Xarunta Georgetown University ee Waxbarashadda iyo Shaqaalaha (CEW). *IOWA: Socodka Waxbarashadda iyo Shaqaalaha 2025, Xarunta Georgetown University ee Waxbarashadda iyo Shaqaalaha* (CEW), files.eric.ed.gov/fulltext/ED574373.pdf.

[2] Bromberg, M. (2016, Maarso 31). Qaadashada duruusta qalinjabinta: Natiijada warbixinta ee ka qalinjabinta dugsiga sare. Laga soo baxay Maarso 24, 2021, https://eric.ed.gov/?id=ED566663

PLAN

1

2

# QORAALKA WAKHTIGAN WADA SOCDA (CE)

CE Information—https://schools.utah.gov/curr/earlycollege?mid=1354&tid=2

## Waa Maxay?

- Fasalo lagu helo dhibcaha dugsiga sare iyo kuuliyada isla mar kaliya.
- Fasalada waxaa dhiga borofeesar ama macalimiinta dugsiga sare oo haysta shahaadada maasterka; waxa lagu bixinayo waxaa sameeyay jaamacada oo waxaana badanaa lagu dhigtaa onleyn ahaan.
- Dhibcaha lagu heley fasalkan waxaa lagu darayaa warbixinta dhibcaha waxbarashada ee kuuliyada ee ardayda.

**Dhibcaha CE waxaa loo wareejin karaa badanaa kuuliyadaha iyo jaamacadaha Utah.**

## Ardayda CE:

- Ma doonaysaa inaad bilawdo duruus kuuliadeed oo lagu bixiyo dugsiga sare ah
- Kuu qorshaysan tahay inaad gasho dugsiga farsamada ama jaamacada Utah
- Waxa aad doonaysaa xirfado/shaqo gaar ah (sida, farsamo ama daryeelka caafimaadka)

## Xirfadaha La Bartay iyo Lagu Shaqeeyay:

- Xidhiidhka—helida iyo bixinta fariimaha
- Qorshaynta, habaynta iyo maamulida
- Masuuliyada, go'aan qaadashada, iyo hogaanka
- Xalin mushkiladeed, qiimaynta iyo fikirka
- Wada shaqayn—kala shaqaynta dadka kale wixii yoolashada caamka ah
- Waxbarashada mudada dheer ah

Ardayda Utah yareeyaan kharashkooda $75 milyan oo doolar ugu yaraan sanadkii marka ay isticmaalaan barnaamijyadan ay ku helaan dhibcaha kuuliyada iyaga oo weli ku jira dugsiga sare.

# MIHNADA IYO WAXBARASHADDA FARSAMADA GACMEED (CTE)

Macluumaadka CTE—https://schools.utah.gov/cte

## Waa Maxay?

- Barnaamijyada mihnada diirada saara ee ardayda u bilaabi kara dhabada ay ku helayaan shahaadooyinka dugsiga sare kadib, goobta shaqada, mihnada iyo duruusta kuuliyada.
- Xirfadaha farsamo, waxbarashada iyo shaqaalaynta ee duruusta CTE, waxbarashada shaqada ku salaysan iyo is wada qorista.
- Duruusta taxane ah oo u sahasha ardayda dugsiga sare inay baadhaan mihnada diirada lagu saaray darista inta loo diyaarinayo ardayda waxbarashada dugsiga sare kadib iyo ikhtiyaarada mihnada.
- Dhabada Mihnadu waxay siisaa ardayda xirfadaha daruuriga u ah mihnadaha dugsiga sare kadib.

**Duruusta badan oo CTE ah waxaa weeye duruusta CE (waxaa lagu daraa dhibcaha kuuliyada). Waxa aad waydiisaa lataliyaha dugsiga wixii macluumaad dheeraad ah oo arrintan ku saabsan.**

## Ardayda CTE:

- Helitaanka shahaadooyinka gobolka iyo shaqada iyo shahaadooyin la aqoonsan yahay oo shaqada ah
- Dalbo waxbarashada si aad u hesho fursadaha waxbarashada ee la hayo
- Waxa aad doonataa fursado tobobar shaqo si aad u barato xirfado

## Xirfadaha La Bartay iyo Lagu Shaqeeyay:

- Fursaha waxaa la siiyaa ardayda si ay uga qayb galaan tobobarka shaqo, ku barashada shaqada, tobobar ama tabobar shaqo.
- Fursado kala duwan oo lagu baranayo mihnado kala duwan
- Waxa uu bixiyaa xidhiidhin waxbarashadda dugsiga sare kadib iyo shaqaalaysiinta iyada oo la samaynayo booqashooyin meesha ah
- Waxa uu bixiyaa fursado lagu heli karo shahaadooyin aagaga mihnadaha ah

# SHAHAADO BAAJOLAAR OO CAALAMI AH (IB)*

Macluumaadka IB—
https://schools.utah.gov/curr/earlycollege?mid=1354&tid=4

## Waa Maxay?

- Fasaladu waxaa diirada lagu saaraa qoraalka, daraasadayn iyo baadhitaan ku salaysan (oo waxaa dhiga macalimiin haysta shahaado IB ah).
- Ardayda IB waxay diirada saaraan mushkiladaha caalamka oo waxay ku celiyaan bulshada (adeega waxbarashada).
- Ardaydu waxay heli karaan Dhibloomada IB iyo sidoo kale dhibloomada dugsiga sare.
- Waxay heli karaan 30 saacadood oo kuuliyad ah kuwaas oo lagu bixiyo jaamacada.

**Barnaamijka IB waxaa laga aqoonsan yahay heer caalami oo waxaa weeye furaha lagu galo dugsiyada Ivy League iyo barnaamijyada maamuuska ee U of U.**

## Ardayda IB:

- Muujinta rabitaanka iyo himilada aagag badan oo mawduuca ah—oo aan kaliya ahayn aaga lagu xoogan yahay
- Ma doonaysaa inaad ku dabaqdo waxbarashadooda caalamka dhabta ah

## Xirfadaha La Bartay iyo Lagu Shaqeeyay:

- Inaad barato xirfado aad ku samayso baadhitaan iyo daraasad
- Nuxurada baadhitaanka (deegaanka iyo caalamka oo waawayn)
- Dabaqaada xirfadaha ka baaraan daga iyo ikhtiraaca
- U soo bandhiga fikirada si kalsooni ah oo wax wada qabsi leh
- In la soo bandhigo dareen xoogan oo cadaalad, sinaan iyo qadarin maamuuska shakhsiyaadka, kooxaha, iyo bulshooyinka

* Dhawr dugsi oo Utah ah waxay bixiyaan barnaamijka Shahaadada Baajolaarka Caalamiga ah. Waxa aad booqataa lataliyahaaga dugsiga si aad u ogaato hadii barnaamijka aad ka heli karto degmo dugsiga/dugsiga gaarka ah ee deegaankaaga.

Utah State Board of Education
250 East 500 South
P.O. Box 144200
Salt Lake City, UT 84114-4200

Sydnee Dickson, Ed.D.,
Maamulaha Gobolka ee Tilmaamaha Shacabka